Ma lagugu sameeyay takoorid dhinaca suuqa guryaynta?

Malmö
mot
Diskriminering

Sharciga Iswiidhan wuxuu damaanad qaadayaa in ciddaad doonto aad ahaatid ee dhamaan isku xuquuq la yahay. Iswiidhan waxay kaloo saxiixday heshiisyo in guryuhu yihiin xuquuq bina aadam. Si kastaba ha noqotee, waxay takooriddu siyaabo badan uga dhacdaa suuqa guryaynta. Waxaannu rabnaa inaan xaashidan macluumaadka aan ku bixinno sawir ku saabsan sida sharcigu u shaqeeyo marka lagugu sameeyo takoorid la xidhiidha guryeynta iyo takoorka jinsiyadeed, laakiin waxa sidoo kale tusaalooyinka loo isticmaali karaa sababo kale oo takoor ah. Waa maxay takooridu, sharci ahaan? Sidee takoorku u dhici karaa? Yaa ka mas'uul ah, xageedse u jeedsan kartaa haddii lagu takooro?

Haddii aad rabto macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan qodobbada Xeerka Takoorka iyo inaad aragto waxa ku qoran sharciga, waxaad baari kartaa Xeerka Takoorka (diskrimineringslagen 2008: 567).

Waa maxay takoorku?

Takoor micnahiisu waa in laguula dhaqmay si ka xun sida qof kale, sababo aqoonsi awgood. Sida sharciga ku qeexan, aqoonsiyada qofka lagu takooro waxa loogu yeeraa sababo takoorid. Marka loo eego Xeerka Takoorka, waxa jira toddoba sababood oo takoor ah, waxayna kala yihiin: aqoonsiga ama muujinta jinsi, qowmiyadda (waxaa ku jira midabka iyo qowmiyadaha kala duwan sida Iswidishka, Roma, Suuriyaanka, Shiinaha, iwm), diinta ama caqiidooyin kale, naafada, nooca galmada iyo da'da.

Goorma ayuu takoor dhici karaa?

Dhinaca suuqa guryaynta, waxa ku takoori kara dad kala duwan oo lagugu takoori karaa siyaabo kala duwan. Hoos waxaa ku yaal **tusaalooyin** goorta ay dhici karto takoor la xidhiidha guryaynta:

Tusaalaha kowaad, kireysi guri:

Qoys asal ahaan ka soo jeeda Roma ayaa doonaya inay kireystaan guri ku yaal Staffanstorp. Waxa loo soo bandhigay inay soo eegaan guriga, mulkiiluhuna wuu ku qanacsan yahay. Laakiin markay yimaaddeen oo mulkiiluhu arko ee uu maqlo magacyadooda qoys'kaas, ayuu fahmay inay yihiin qowmiyadda Roma. Markaasuu kadib u sheegay in aqalka aan la kiraynayn, in kastoo mulkiiluhu horey u yiri in uu kiraynayay.

Tusaale labaad, guri beddelid:

Hooyo soomaaliyeed oo kaligeed ah ayaa dooneysa inay bedesho gurigeeda iyadoo isleh inaanay meeshay deggan tahay u fiicnayn amniga carruurteeda. Waxay la hadashay mulkiilaha guriga laakiin wuxuu u sheegay inaanay guryo ka bannaanayn meelo kale. Hooyadu way ogtahay in saaxiibteed oo iswiidhish ah oo ay isku dakhliga yihiin in ay carruurteeda u rartay guri dabaq ah oo xaafad kale ku yaal.

Tusaalaha seddexaad, dhibaatayn deris:

Qoys qowmiyadda Roma ah oo leh afar caruur ah ayaa jaarkoodu cabashooyin badan ka soo gudbiyeen sababo heerka qaylo badan awgeed. Waxay jaarku sidoo kale soo direen qoraallo ay ku cadeynayaan in aanay dooneyn dad reer Roma ah (jaranjaradooda). Qoysku waxay ka baqayaan in guriga laga saaro haddii cabashooyin kale laga gudbiyo waxaanay si joogto ah u aamusiyaan carruurta. Qoysku waxay u sheegeen mulkiilaha inay xaalad adag ka haysato deriska, laakiin mulkiiluhu waxba kama qaban wuxuuna sheegay in derisku xaq u leeyihiin inay ka cawdaan.

Tusaalaha afraad, diidmada dayactirka guriga:

Lamaane waayeel ah oo ciraaqiyiin ah ayaa ku nool guri kiro ah oo qasabadda musqushu ay ka xumaatay. Waxay la hadleen mulkiilaha guriga oo dhahaya mar dhawayd ayaannu hagaajinnay qasabadda, dadka ajaanibkuna guryaha way kharaabiyaan. Lamaanuhu may helin cid ka caawisa qasabadda.

Tusaalaha shanaad, shuruud dakhli:

Qoys ka kooban shan carruur ah oo ka yimid Nayjeeria ayaa u baahan inay guri helaan. Waalidku ma shaqeeyaan laakiin sooshalka ayaa lacag siiya. Waxay heleen guri bannaan laakiin mulkiilaha gurigu wuxuu ku xidhay inay shaqo hayaan oo mushahar soo galo si ay u dalbadaan guriga.

Tusaalaha toddobaad, sooshalka oo aan kaa caawin inaad guri hesho:

Nin aan ku hadlin iswiidhishka laakiin ku hadla kaliya Lovara (lahjad reer Roma ah) ayaa gurigii laga saaray wuxuuna codsaday inay sooshalku caawiyaan si aan'uu hoy la'aan u noqon. Hawl-wadeenka sooshalka ayaa weydiiyay sababta aanu ninku u baran iswiidhishka wuxuuna ku dhahay ma helaysid wax caawimo ah haddaanad baran luqadda.

» Dhammaan tusaalooyinka aynu soo qaadannay waxay ahaayeen takoor, waana mamnuuc sharci ahaan.

Yaa ka mas'uul ah takoorka?

Marka loo eego Sharciga Takoorka, qofka kireynaya ama iibinaya guriga ayaa ka mas'uul noqon kara. Sharcigu ma daboolayo shakhsiyaad gaar ah, **sidaas darteed xeerka takoorku ma qabanayo qof tusaale ahaan gacan labaad guri ku kireynaya**. Shakhsiyaadka gaarka ah ee jaarka ama farsamayaqaannadu mas'uul kama aha, hase yeeshee, mulkiilaha ayaa ka mas'uul ah hadii jaarku is dhibaateeyaan ama is takooraan. Kuwa mas'uuliyaddu saaran tahay tusaale ahaan waa mulkiileyaasha guryaha, dillaaliinta, ururada mulkiilayaasha guryaha iyo sooshalka (dowlada hoose).

Maxaan sameyn karaa haddii la ii takooray?

Ombudsmanka takoorka ayaa ah mas'uulka dawladda ee u qaabilsan raacitaanka xeerka takoorka.Haddii lagu takooray, waxaad dacwaddaada ku soo diri kartaa boggooda internet-ka:

- ***www.do.se/tips-ochw-klagomal***

Waxaad sidoo kale u dacwoon kartaa mid ka mid ah hay'adaha ka hortagga takoorka ee Iswiidhan, Hay'adda Malmö mot Diskriminering ayaa ka mid ah oo halkan ayaad kala xiriiri kartaa haddii aad deggan tahay koonfurta ama bariga Skåne:

- ***www.malmomotdiskriminering.se***
- ***radgivning@malmomotdiskriminering.se***

Dhibaatooyinka ugu waaweyn ee kiisaska takoorku waa iyadoo ay adag tahay in la helo caddeymo. Sidaa darteed, waxaa muhiim ah inaad keydiso dhammaan caddeymaha aad haysid. Tusaale ahaan, waraaqaha, emaylka, duub codka ama muuqaal, ama qof kuu markhaati furi kara u kaxayso (kulammada) markaad dareento takoor.

Hadaad dacwad takoor u gudbiso Ombudsmanka takoorka ama annaga, waxa loo baahan yahay caddeymo si loo tusi karo maxkamadda in takoor dhacay.

Haddii maxkamadda laga hor caadayn karo in takoorku dhacay, oo tusaale ahaan, mulkiile guri lagu xukumay fal takoor, waxa qofka falkaa lagula kacay xaq u leeyahay magdhaw loo yaqaan magdhow takoor.

Det här informationsbladet finns tillgängligt på **svenska**, **engelska**, **arabiska**, **somaliska**, **persiska**, **lovara**, **polsk romani**, och **arli** på vår hemsida:

- ***www.malmomotdiskriminering.se/bostad***

Malmö mot Diskriminering
Nobelvägen 36 C
214 33 Malmö

Epost **info@malmomotdiskriminering.se**
Telefonnummer **040 636 51 40**
Org.nummer **802455-5867**
Bankgiro **694-3070**

MED STÖD AV DELEGATIONEN MOT SEGREGATION